4. Haddii ay dhacdo xaalado nabadgelyo darro oo saameeya laba degmo ama ka badan ee isla Gobol ah, waxaa agaasinka hawsha Boliiska la wareegaya Taliyaha Qaybta Boliiska Gobolkaas, isagoo la shaqaynaya Guddooomiyaha Gobolka, kana tilmaan qaadanaya taliyaha Ciidanka.

5. Haddii degmooyinka hawsha nabadgelyada laga qabanayaa ku kala yaaliin laba Gobol ama wax ka badan waxa awooda hawlgelinta Ciidanka Boliiska la wareegaya taliyaha Ciidanka isagoo ka tilmaan qaadanaya Wasiirka Arrimaha Gudaha.

6. Haddii ay dhacdo in dembiile ka baxsado meesha uu dembiga ku galay una gudbo degmo kale, soo qabashadiisu waa waajib saaran Fadhiga Boliiska ugu dhow, sidoo kale Boliiska Degmada uu dembiga ku galay waa raacdaysan karaan durbadiiba si loo soo qabto; waxase shardi ah inay la socodsiyaan Boliiska xadka ay ka hawlgelayaan.

Qodobka 13 (Duqa Magaalada)

Ciidanka Boliiska heer deegaan wuxuu hoos imanayaa Duqa Magaalada Maamul ahaan iyo Shago ahaan, wuxuuna leeyahay dhamaan awoodaha uu xeerkani siinayo

Qaybta 3aad
Qaab-dhismeedka Ciidanka Boliiska

Qodobka 14 (Hanaanka Dhismaha Ciidanka)

Iyadoo Qodobka 2aad ee Xeerka dhismaha Ciidanka wax loo dhimayn, Ciidanka Boliisku wuxuu u dhisan yahay sidan soo socota:-

B. Taliska Ciidanka Boliiska;
T. Ciidanka Boliiska Heer Qaran:
ii. Lamaha;
iii. Qaybaha;
iv. Fadhiyada Gobollada iyo degmooyinka;
J. Ciidanka Boliiska heer deegaan;
i. Saldhigyada Boliiska;
ii. Rugaha.

Qodobka 15 (Awoodda wasiirka Arrimaha Gudaha)

Marka laga reebo amarrada uu bixin karo Madaxweynuhu, Wasiirka Arrimaha Gudaha wuxuu soo saari karaa awaamiir tilmaamaysa ama saamaynaysa hawsha Ciidanka Boliiska.

Qodobka 16 (Awooda taliyaha Ciidanka)

1. Taliyaha Ciidanka isagoo dhawraya Xeerarka u degsan Ciidanka Boliiska wuxuu awood u leeyahay habaynta qaab dhismeedka Ciidanka, isku shaandhaynta, kala sareynta Talisyada kala duwan, isku bedelka iyo abuuritaanka kuwo cusub isagoo la socodsiinaya Wasiirka Arrimaha Gudaha.

2. Taliyaha Ciidanka Boliiska ayaa yeelanaya amarka iyo xilka hawlgelinta Ciidanka Boliiska, isagaana masuul uga noqonaya dawladda isagoo sii maraaya Wasiirka Arrimaha Gudaha.

3. Taliyaha Ciidanka Boliisku waa inuu la socodsiiyaa Wasiirka Arrimaha Gudaha wararka muhiimka ah ama xiisaha gaarka ah leh, marka loo fiiriyo xaaladda guud iyo kuwa gaar ahaaneed ee Dalka.

4. Taliyaha Ciidanka Boliiska isagoo xoojinaya talaabooyinka saamaynaya Qaab-dhismeedka hagaagsan, qalabaynta iyo xanaanada Boliiska wuxuu fulinyaa:-

B. Hawsha Ciidanka Boliiska ee Dalka oo dhan isagoo raacaya Xeerarka iyo awaamiirta Madaxda sare;

T. Wuxuu bixinayaa awaamiir la xidhiidha habka Qorista Ciidanka, Qaybinta Ciidanka, agaasinka qalabka fadhiyada kala duwan isagoo tixgelinaya baahida joogtada ah ee kolba jirta,

J. U magacaabidda Taliyayaasha Fadhiyada iyo Xafiisyada kala duwan xubno Boliis oo karti u leh hawsha,

X. Kormeerka barnaamijyada tababarada Ciidanka,

Kh. Qorista, Dalacaada, shaqo ka tegista Ciidanka Boliiska heer Qaran isagoo tixgelinaya jaangooyada Ciidanka iyo ku talo-galka Miisaaniyadda Dalka.

D. Dhammaan saraakiisha Ciidanka Boliiska heer qaran dalacaadooda, asluubtooda, shaqo ka tegistooda iyo fasaxooda waxay hoos imanayaan awoodda Taliyaha Ciidanka Boliiska, sidoo kale saraakiisha heer deegaan, Asluubtooda shaqo ka tagistooda iyo fasaxooda waxaa leh Taliyaha Ciidanka iyadoo la tixgelinayo warbixinta Duqa Magaalada ee uu sarkaalku hoos yimaado.

R. Wuxuu leeyahay awoodaha uu sharcigu u siinayo bixinta abaalmarinta iyo asluubta Ciidanka.

S. Awoodaha ku xusan xubinta 4aad ee Qodobkan wuxuu Taliyahu u xilsaaran karaa Saraakiisha sare ee Ciidanka.

Qoodbka 17 (Awoodda Taliye Xigeenka)

Talive-xigeenka Ciidanka wuxuu kaalinayaa taliyaha Ciidanka, waxaa kale ee uu qabanayaa hadba hawshii loo xilsaaro.

2. Talive -xigeenka ayaa qabanya hawshii taliyaha Ciidanka haduu magan yahay ama shaqayn kari waayo taliyuhu, wuxuuna yeelanayaa dhammaan awoodihii taliyaha Ciidanka isagoo socodsiinaya tilmaamihii iyo hawlihii Ciidanka Boliiska.

3. Haddii ay dhacdo inay isla maqnaadaan ama labadooduba shaqayn kari waayaan, waxaa xilka qabanaya Sarkaalka ugu mudan xagga derejada saraakiisha markaas joogta, hadday derejada ka siman yihiin mudnaanta waxaa la siinayaa ka ugu horqaatay, hadday isku mar qaateen, mudnaantu waa kan shaqada ugu soo horeeyey, intaasba hadday ka simanyihiin waa kan Taliyuhu Magacaabo.

Qodobka 18 aad(Wada shaqeynta Boliiska heer qaran iyo deegaan)

Wada shaqeynta Ciidanka Boliiska heer qaran iyo heer deegaan waa mid toos ah, habka wada shaqeyntoodu waxay ku soo bixi doontaa amarada joogtada ah ee Ciidanka.

Qodobka 19 (kala horreynta)

derejada Ciidanka Boliisku waxay u kala horreynayaan sidan soo socota:-

i. **Saraakiisha Guud**

ii **Saraakiisha Sare**

B. G/le Sare
T. G/le Dhexe
J. G/le G/le

iii **Saraakiisha Hoose**

B. Dhamme
T. L/Xiddigle
J. Xiddigle.

iv **Kormeerayaal**

B. K/Saddexaad
T. K/Labaad
J. K/Kowaad.

V **S/Xigeen**

B. S/Alifle
T. L/Alifle

Vi **Layli Saraakiil**

Vii **Dabley**

B. Alifle
T. Dable
J. Layli/Dable

2. Marka laga reebo xaaladaha gaar ahaaneed xubinta Ciidanka Boliiska ee ugu mudan xagga derejada ayaa taliye ka noqonaya Fadhiga uu ka tirsan yahay.

3. Haddii uu maqan yahay ama uu shaqayn kari waayo Taliyaha Fadhigu, xubinta ugu derejo xigta ayaa kusime ahaan ula wareegaeysa xilka Taliyenimo ee Fadhiga, haddii ay fadhiga joogaan xubno isku derejo ah Taliye ku sime waxaa noqonaya midka ugu mudan haddaanu si kale amrin Taliye Sare.

Qodobka 20 (Calaamadda derejada)

Calaamadda derejada Ciidanka Boliiska waxaa lagu sheegayaa Xeer madaxweyne iyadoo uu sidaa soo jeediyey Taliyaha Ciidanku, lana dhegeysatay Wasiirka Arrimaha Gudaha.

Qodobka 21 (Lebiska iyo Qalabka)

Haddii aan si kale loo sheegin xubnaha Ciidanka Boliisku waxay sidanayaan markay hawsha hayaan lebis u cayiman, waxaa kaloo sidan karaan markay hawsha hayaan hub iyo Rasaas waqtiga iyo kolba siduu amro Taliyaha Ciidanku.

Qaybta 4aad
Arrimaha Ciidanka

Qodobka 22 (Musharka iyo Gunnada)

Mushaharka iyo Gunnada Ciidanka Boliiska waxaa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne.

Qodobka 23 (Galka Ciidanka)

Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Boliiska waxaa loo furayaa loona habaynayaa gal ay ku jiraan xaashiyo iyo warqaado ku saabsan xaaladda shaqadiisa iyo xidhiidh-hawleedkiisa.

Qodobka 24 (Dhaarta)

Qof kasta oo muwaadin ah oo xubin ka noqonaaya Ciidanka Boliiska waxaa laga rabaa inuu dhaarto.

2. Xubin kasta oo hawl qab noqota ka reebi meyso hawlganimadiisu waajibaadkay saartay dhaartu.

3. Xubnaha Ciidanku waxay dhaarta u marayaan Qof-Qof.

Qodobka 25 (Qaabka Dhaarta)

Xubnaha Ciidanka Boliiska waxay u dhaaranayaan sidan soo socota:-

(Waxaan Magaca Ilaahay ku dhaaranayaa inaan daacad u ahay Jamhuuriyadda S/Land (dalkeeda, dadkeeda iyo diinteedaba) inaan si daacad ah u ilaaliyo Xeerarkeeda, una adeeco si aan hakrasho lahayn awaamirta Madaxda Sare. Waxaan ku dhaaranayaa inaan u dhaqmo si sharaf leh, Asluub wanaag iyo Geesinimo, Xaalad kastoo laqu jiro mid dagaal iyo mid nabadgelyoba, anigoo ilaalinaya sirta Ciidamada iyo tan shaqada, kuna dhaqaagaaya Talaabo kasta oo laqu sugayo Xanaanaynta iyo Daryeelka Qalabka la igu aaminay).

Qodobka 26 (Kala horeyn)

Xubinta Ciidanka Boliiska ee hawlgabka noqota, waxaa xilka talisnimo (Command) ka leh haddii ay isku derejo noqdaan Xubinta hawsha haysa.

Qodobka 27 (Mudnaanta kala horeynta Derejada)

Mudnaanta Derejada laga hadlaayo waxaa xadeeya sida loo kala horgaatay;

2. Haddii Xubno badan derejo isku mid ah mar wada qaataan, mudnaanta derejada waxay u kala yeelanayaan siday Liiska Faafinta Madaxweynaha ama Awaamiirta joogtada ah ee taliyaha uga kala horeeyaan.

3. Haddii ay dhacdo in mudnaanta derejada lagu kala saari waayo sida ku cad xubnaha kowaad iyo labaad ee isla Qodobkan, waxaa dib loo eegayaa derejooyinkii ay lahaayeen ee ka horeeysay tan laga hadlaayo, haddii mudnaanta derejo lagu kala saari waayo sida kor ku xusan waxay mudnaantu ahaanaysaa taariikhda Qorista Ciidanka.

4. Casilaadda Xubnaha ka tirsan Ciidanka Boliiska saamayn mayso mudnaanta derejo ka hor derejadii uu u dalacay.

5. Haddii ay dhacdo in Caasilaadu ku timaado derejo ka duwan tii uu haystay, mudnaanta derejo waxay uga bilaabmaysaa taariikhda uu u dalacay mida loo celiyey.

Qodobka 28 (Qorista ku meel gaadh)

Haddii loo baahdo kordhin Ciidanka Boliiska oo ku meel gaadh ah, waxaa la raacayaa habkan soo socda:-

B. Xubin kasta oo si ku meel gaadh ah loo qoro Ciidanka, waxay lahaanaysaa Xuquuqda iyo waajibaadka Ciidanka Boliiska ee Sharcigu tilmaamayo.

T. Haddii ay dhammaato asbaabtii keentay kordhinta Ciidanka, dhammaan ama qaar ka mid ah shaqada waa laga siidayn karaa, waxaanay lahaanayaan Xuquuqda uu sharcigu siinayo muddadii ay shaqada hayeen.

Qeybta 5aad.(Xaaladda Shaqada)

Qodobka 29 (Qorista Ciidanka)

Qorista shaqada ee xubnaha Ciidanka waxaa lagu dhaqayaa Qod. 5aad ee Xeer-nidaamiyaha Ciidanka Boliiska.

Marka loo baahdo ee Saraakiil Boliis ah la qoraayo waxaa la soo saarayaa baaq tartan oo muujinaaya:-